



Ku soo dhawoow qoraalka Tilmaamaya Illaha Daryeelka Socotada hayaanka ah ee Degmada Santa Clara County!

Ujeeddada laga leeyahay qoraalkan tilaamanta ah wuxuu yahay in lagu **war-geliyo** lana **Baro** dadka socotada cusub iyo midda hore u degganeedba xaqqa ay u leeyihiin barnaamijyada iyo adeegyada kaalmo ee ay heli karaan iyaga iyo qoysaskooduba. Muraadkayagu wuxu yahay inaan ku **dhiiri gelino** sidii ay uga faa'iidayaan lahayn ugana **war heli** lahaayeen hayadaha sharciyada iyo waxa ay xaq ugu leeyihiin.

Tilmaamahani waa shan qaybood.

- ☞ Caafimaadka iyo fay-qabka
- ☞ Daryeelka Qoyska
- ☞ Sharciga iyo Xuquuqda
- ☞ Xuquuda Wax-barsho
- ☞ Arrimaha Shaqaaleynta iyo Xaqqa Shaqaalaha

Qayb kasta waxa u kala baxda madaxyo

Tusaale ahaan qaybta caafimaadka waxa ku jira Daryeelka Caafimaadka, Daqdiga /Fayoobida Maskaxda , Cuntada iyo Nafaqada.

Qayb kastaa waxay bixinaysaa war ku saabsan hay'ado bixiya adeegyo baaxad leh oo loogu tala galay socotada iyo qoysaskooda.



Erayada loo isticmaalay qoraalka

Buuggan waxa loo qoray Socotada, looma kala qaadin xaaladooda sharci. Hase yeeshe, daryeelada qaarkood ayaa u baahan inay dadku u qalimi karaan



Ma raadinaysa fasal Ingriiska lagu barto oo dariskaaga ah? Ka fiiri boqolaalka fasal ee Ingriiska laga barto iyo jadwalkood oo laga helo Santa Clara County shabakadda internetka www.immmigrantinfo.org

"Socoto la aqoonsanyahay." Qof ka oo noqon kara mid ahaan kuwan:



U.S citizen - qof ku dhashay wadanka Maraykanka gudhiisa, amd dibedda dalka oo ay dhaleen mawaadiniin Marakan ah, ama qof jinsiyad qaatay iyo carrurta ay gaarin 18 sano ee waalidkood jinsiyadda qaatay.

Lawful permanent resident - Qof La siiyay fiisa uu ku joogi karo dalka Maraykanka (green card).

Refugees - Qof aan mawaadin ahayn oo dalka dibadiisa joogay lana siiyay ogolaansho inuu soo geli karo kuna noolaado Maraykanka, kaasoo ka baqaya in wax yeello ku soo gaarto wadankiisa.

Asylees - Qof aan mawaadin ahayn oo jooga dalka gudhiisa is dhiiba lana siiyo fasax uu ku joogi kara dalka. Qof kasoo ka cabsi qaba dalkiisa in lagu dhibaatay doono .

Persons granted withholding of deportation or removal - Dad aan mawaadiniin ahayn oo loo ogolaaday inay dalka iska joogaan, taasoo loo eegay haddii la celi inay naftooda dhibaato soo gaari karto. is similar to, but separate from asylum.

Cuban/Haitian entrants - Mawaadiniin Kuba iyo Haytii ee loo ogolaaday inay soo galaan Maraykanka ama laga cafiyay sharciyada qaar, lana filayo inay wadanka kjoogi doonaan si ku meel gaar ah ama rasmi ah. Dadkaas waxay la mid yihiin qaxootiga ama isdhiibayaasha haddana wax yar ka gedisan .

Amerasians - Dad u dhashay Veitnam oo sharci gaar ah loogu ogolaaday inay rasmi u deggan dalka. Si loo siiyo sharciga waa inqofku ku dhashay Veitnam intii u dhaxaysay Janaayo 1962 ilaa Janaayo 1976, waalidkiisna mid yahay araykan ama u dhalay qof qoys maraykan ah ka tirsan.qoys Maraykan ah ka tirsan.